

Dib u dhiska saraha dhaadheer

Wargeyska Bulshada

Diseembar 2023



Muuqaalka kor laga soo qaaday ee labada dabaq "Red Bricks" ee la dumiyay ee dib u dhiska lagu sameynayo ee Carlton

Daabacaadan waxaa ku qoran, qorshyaalka guryaha cusub, iyadoo dib-u-dhiskii ugu horeeyay ee dabaqyada Carlton ay bilaabatay iyo sii wadida Dhismaha Guryaha Weyn (Big Housing Build) ee Prahran, South Yarra, Port Melbourne iyo Hampton East. Iyadoo dad badan oo reer Victoria ah la siin doono guryo ka badan kana fiican kuwii hore.

Waxaan sidoo kale uga hadli doonaa sida codka kiraystaha ay qeyb uga tahay dib-u-dhiska saraha dhaadheer.

Guryo dadweyne/dowlad oo ka badan kana sii fiican kuwii hore oo ku yaal Carlton

Raysal Wasaare Anthony Albanese iyo maamulihii hore ee gobolka Daniel Andrews ayaa ku dhawaaqay qorshe dib loogu dhisayo guryaha dabaqyada dheer ee dadweynaha/dowlada ee Carlton. Kuwani waa dabaqyadii ugu horeeyay ee dib-u-habayn lagu sameeyo oo mashruucan ah waxaana la dhameystiri doonaa dhammaadka 2028.

Dhismayaasha Red Bricks ee Carlton, oo ku yaal cidhifka Nicholson iyo Elgin Streets, waxay dhisnaayeen laga soo bilaabo 1960-meeyadii ilaa 2021, kiraystayaasha ayaa laga caawiyay guuritaanka ka dib markii da'da saraha ay sababeen, burburka nidaamyada dhismayaasha.

Kuwan 196 ah ee aan ku haboonayn guryaha ujeedada ah waxa lagu badali doonaa kuwo casri ah, tamar ku filan, iyo guryo la geli karo iyadoo goobtan laga bixin doono ugu yaraan 16% tiro ka badan intii hore ee guryaha dadweynaha/dowlada.



Horaanta 2024

Ka-qaybgalka bulshada (aragti hore)



2024

Diyaarinta shaqada goobta



2024

Ka-qaybgalka bulshada ee naqshadeynta



2025

Dhismuhu wuu bilaabmayaa



2028

Guryo cusub ayaa la bixiyay

Homes Victoria waxay aqoonsan tahay Mas'uuliyiinta Dhaqanka ee dhulka laga dhisayo gurigan. Waxaan xushmad badan u heynaa odayaashoodii hore iyo kuwa hadda nool.

Codka kiraystaha ayaa hagaya dib u dhiska saraha dhaadheer



Dib u eegista kireysteyaasha si loo wanaajiyo wadahaadalka

Barnaamijka Paving the Way Forward ee Flemington iyo North Melbourne waxa uu martigelinayaa dib u eegis iyo hagaajinta guddiga isgaarsiinta iyo codka kiraystaha.

Waxa hadda diiradda la saarayaa waa taageeridda habka dib-u-dejinta, in la eego macluumaadka ay tahay in la bixiyo, sida loo fasiray iyo sida ugu wanaagsan ee macluumaadka loo siin karo bulshada.

Maxaa adiga muhiimad kuu leh? Wada-qaabaynta Mabaadi'da Bulshada

Codka kiraystaha ayaa udub dhexaad u ah naqshadaynta iyo keenista mashruuca dib u dhiska saraha dhaadheer. Taasi waa sababta aan ula shaqeyneyno kireysteyaasha si aan u dhisno mabaadi'da. Mabaadi'da ayaa hagi doona qorshaynta hore iyo dib u dejinta ilaa dhameystirka dhismaha iyo kusoo noqoshada kiraysteyaasha ay kusoo noqonaayaan guryaha cusub.

Waxaan dhawaan qabanay aqoon-is-weydaarsiyo iyo kulamo wada-sheekeysii oo aan la yeelanay boqolaal (100s) kireyste oo ka kala yimid dhammaan saraheena dhaadheer. Waxaan dhageysanay fikrado aad u wanaagsan oo ku saabsan mowduucyo kala duwan oo ay ku jiraan qiyamka muhiimka kuu ah, sida aan u wada shaqeyno iyo natijoooyinka ay tahay inaan mudnaanta siino.

Waxa aanu horaanta sanadka 2024 kula hawlgeli doonaa dhammaan kiraysteyaasha iyo bulshooyinka ku xeeran qaab qabyo ah oo mabaadi'da ah.

Ogow dhacdooyinka ka-qaybgalka mabaadi'da ee ka dhacaya xaafaddaada.

Booqo homes.vic.gov.au/high-rise-redevelopment-community-engagement



Noofeembar 2023

Wada hadallada lala yeelanayo daneeyayaasha bulshada



Noofeembar/Diseembar 2023

Aqoon-is-weydaarsiyo lala yeelanayo kooxaha codka kiraystaha



Horaanta 2024

Ka qayb qaadashada mabaadi'da bulshada ee qabyada ah



Maarso 2024

Mabaadi'da ugu dambeysa ee bulshada ayaa la daabacay



Kala hadlida kiraysteyaasha Waqooyiga Melbourne iyo Flemington madasha Suaalaha & Jawaabaha

Guryo badan oo tayo leh oo loogu talagalay Koonfur-Bari (South-East) Melbourne

Aragtida farshamiisteyaalka (artists) ee guryaha cusub ee Simmons Street, South Yarra

Iyadoo dib u dhiska saraha dhaadheer uu socdo waxaan sii wadeynaa bixinta guryo cusub oo ka wanaagsan kuwii hore loona marayo Dhismaha Guryaha Weyn (Big Housing Build). In ka badan 1300 guri oo cusub oo ku yaal South Yarra, Prahran, Port Melbourne iyo Hampton East, ayaa kordhinaya guryaha bulshada ee goobahan ugu yaraan 31%. Tani waxaa ka mid ah 56 guri oo ah kuwo loogu talagalay dadka naafada ah.

Iskaashigan lala yeelanayo Bulshooyinka Dhismaha waxa ka mid ah Guryaha Bulshada Vic Limited iyo taageerada takhasuska leh ee ka timaadda Hindisaha Hantida Haweenka iyo Guryaynta Beesha Aboriginal Vic Ltd (Women's Property Initiatives and Aboriginal Community Housing Vic Ltd) si loo bixiyo maamul kiraysi oo tayo leh, dhismaha bulshada iyo taageerooyinka takhasuska leh.

Tilmaamaha muhiimka ah waxaa ka mid noqon doona:



Goobaha bulshada



1, 2, 3 iyo 4 qol guryo ah



Meelaha banaan ee cagaaran


qiyaastii 2,000sqm.

Kiraystayaasha waxay bixiyeen fikrado wanaagsan oo ku aadan mustaqbalka goobaha Prahran iyo Koonfurta Yarra. Waxaan rajaynaynaa ka-qaybgalin dheeraad ah oo Port Melbourne iyo Hampton East horaanta sanadka 2024 iyadoo dhismuhuna bilaabmayo dabayaaqada 2024.

In lagugu xiro xafladaha agtaada ka dhacaya

Waxaan rabnaa inaan hubinno inaan diyaar u nahay inaan dhageysanno oo aan ka hadalno marka ay kugu habboon tahay. Ka qayb galka suuqii Twilight ee dhawaantan ee Richmond waxay ahayd fursad wayn oo lagu wadaago macluumaadka guud loogana jawaabo su'aalaha ku saabsan mashruuca dib u dhiska saraha dhaadheer. Waxaan sidoo kale kala hadalnay dadka deegaanka 144 guri oo cusub oo laga dhisayo Elizabeth Street.

Sida caadiga ah, bulshada North Richmond waxay la yimaadeen madadaalo iyo farxad furitaankii Deeqaha Bulshada North Richmond. Qof kastaa wuxuu ka helay ciyaaraha, cuntada iyo qoob ka ciyaarka!



La shaqaynta kiraystayaashayada saraha dhaadheer ee Suuqa Habeenka Richmond



Wararkii u dambeeyay ee rarida

Markii lagu dhawaaqay saraha dhaadheer ee Flemington iyo Waqooyiga Melbourne kooxda raritaanku waxay la kulmeen in ka badan 440 qoys oo ka mid ah 485-da qoys, iyaga oo ka taageeraya kiraystayaashan qorshayaasha raritaanada iyo codsiyada.

Waxaa jiray xiiso badan oo loo qabo guryaha cusub ee dhawaan laga heli karo goobahan. Bixinta guriyeynta ayay u dhowdahay inay u bilaabato kireystayaasha la kulmay kooxda raritaanada ee oggolaaday inay helaan dalabyada xaafada ama meelaha kale iyadoo loo eegayo baahiyahooda iyo doorashadooda.

Qoysaska ku nool meelaha kale ee aan hadda loo baahnayn inay ka guuraan waan la xiriiri doonaa si aan u bixino talo iyo taageero.

Marka la gaaro waqtigii laga fikiri lahaa raritaan kooxdayada khibrada leh waxay:

- Bixin doonaan ogeysiis iyo macluumaad badan (oo ay ku jirto luqadda)
- Lagu dhageysto si loo fahmo baahiyaha gaarka ah
- La hubiyo in guriga cusub uu ku habboon yahay kiraystayaasha oo uuna leeyahay xulashooyin waafaqsan baahiyaha kiraystayaasha iyo dookhyada
- La hubiyo in xulashooyinku ay yihiin kuwo xisaabta ku darsada kala duwanaanshaha kireystaha iyo dhaqanka
- La sameeyo da'daal kasta oo lagu taageeri karo qoysas badan si ay u wada joogaan haddii ay taasi tahay rabitaankooda.

Dayactirka iyo howlaha dayactirka ee wali socda

Wixii dayactir degdeg ah, fadlan kala xidhiidh Xarunta Wicista Guriyeynta **13 11 72** ama booqo:

housing.vic.gov.au/repairs



Wax badan ka ogow

Wixii macluumaad dheeraad ah, si aad isu diiwaangeliso wixii ku soo kordha iyo dhacdooyinka kuu dhow, ama macluumaadka luqadaada fadlan booqo:

[homes.vic.gov.au/
high-rise update-Dec-23](https://homes.vic.gov.au/high-rise-update-Dec-23)



I iskaan garee (scan me)



enquiries@homes.vic.gov.au



1800 716 866

La soco **@homesvic**
bulshooyinka

